

Marka aad timaadid maxkamadda, waxaa lagu weydiin doonaa su'aalaha soo socdo:

- Qufac iyo dhuun xanuuna miyaad isku aragtay?
- Qandho miyaad isku aragtay mise ma dareensan tahay qandho?
- Neefta miyaa kugu yar?
- Dhadhanka iyo urka miyaa kaa lumay?
- Miyaad u dhawaatay qof muujiya calaamadahaan 14tii maalin ee la soo dhaafay?
- Qof xanuunsan ama qof la karantiilay miyaad la nooshahay?
- Gobolka miyaad dibadda uga baxay 14tii maalin ugu dambaysay?
- Ma laguugu sheegay in aad qabtid COVID-19 ama bixiyaha daryeelka caafimaadka, wakaaladda caafimaadka dadweynaha, ama sarkaal ka tirsan caafimaadka dadweynaha miyay kaala talliyeen in aad naftaada gelisid karantiil?

Haddii aad ku jawaabtid HAA mid ka mid ah su'aalahaan, waxaa dhici karto in lagu weydiyo su'aalo dheeraad ah iyo, hadba sida aad uga jawaabtid su'aalahaas, waxaa lagu ogolaan doonaa in aad gashid ama waa lagu diidi doonaa in aad soo gashid kaddibna waxaa lagu siin doonaa nambar aad la soo xariirtid si lagu kaalmeeyo. Waxaa dhici karto in lagu weydiyo in aad saxiixdid caddeyn xaqiijisa in aadan qabin calaamadaha kor lagu xusay.

Haddii aad diidid in aad ka qeybgashid hawsha baaritaanka, laguuma ogolaan doono in aad soo gashid kaddibna waxaa lagu siin doonaa nambar aad la soo xariirtid si lagu kaalmeeyo.

Si aad ugu hoggaansantid tallooyinka ay soo jeediso Xarunta Kantaroolka iyo Ka-Hortagga Cudurka (Center for Disease Control and Prevention) iyo si aad u badbaadisid dadweynaha iyo shaqaalaha maxkamadda, qof kasta oo iskudayo in uu soo galo, taasoo jebisa nidaamkaan la dajiyay, Sarkaalka Ammaanka Maxkamadda (Judicial Marshal) ayaa u diidi doono in uu soo galo.

Haddii lagu ballimiyay dhageysiga maxkamadda ama haddii lagaa rabo in aad timaadid mid ka mid ah maxkamadahena ku yaal Maine, kaddibna aadan soo geli karin maxkamadda, taasoo ugu wacan nidaamkaan la dajiyay, waa in aad ku dhaqaaqdid sida soo socoto:

- Haddii uu ku mattalo qareen, fadlan la xariir qareenkaada;
- Haddii uusan ku mattalin qareen, fadlan wac **207-753-2999** si aad kiiskaada kala hadashid karaaniga;
- Haddii aad dooneysid in lagaa badbaadiyo ku-xadgudub ama kadeed, wac **207-753-2999** kaddibna karaaniga ayaa ku kaalmeyn doono;
- Haddii aad tahay qareen, laguna siiyo ballan in aad timaadid maxkamadda, fadlan wac **207-753-2999** si aad karaaniga kala hadashid kiiskaada.

Xayiraaddaan waxay socon doontaa muddo ku meel gaar ah, ilaa laga hubiyo ammaanka si meesha looga saaro. Dhamaan dadka aaminsan in ay ku dhawadeen koronfirus waa in ay isla markiiba la xariiraan bixiyeyaashooda daryeelka caafimaadka.